



Qofkii Ilaahay madax uga dhigo shacab, oo maalinta geeridiisu jooto, dhinta isago soo khiyaamay shacabkiisii, Ilaahay wuxuu ka xarimaa janada

Macqal Binu Yasaar AlMusani Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay scw isagoo dhahaya: " Qofkii Ilaahay madax uga dhigo shacab, oo maalinta geeridiisu jooto, dhinta isago soo khiyaamay shacabkiisii, Ilaahay wuxuu ka xarimaa janada.

[Xadiis Saxiix ah.] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu sheegay in qof kasta oo Ilaahay masuul uga dhigay dad, ha noqoto masuuliyad guud sida Madax wayne, ama masuuliyada gaara sida tan ninka ka saaran gurigiisa, ama gabadha ka saaran gurigeeda, hadii ay dayacaan wixii masuulka looga dhigay, ama ay khiyaanaan oo aanay u naseexayn, oo dayacaan xuquuqdooda diineed iyo tan aduunyo, waxay mutaysanayaan ciqaabtaas adag.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5335>

